aniga ma dhihin balse iyaga ayaa kala qeeybsamay midkii qaldan iyo midkii saxsan uma joogno hadeer.

balse hala ogaado SALAFI ayaan calankooda kor usidaa sheekadaas waa soo xirantay.Umadana wax ka gedmaayo ma ahan sheekadaas.

-AKHWAAN. ama ISLAAX.

Buugaagtooda in aan aqristay waa run balse wax badan kama baranin, beeycana lama gelin.

Ardayda eey wax soobareen hal sheey baan ku nacay oo ah waa Rag Aduunyo.

sidee Bangi xisaabiye uga noqonkartaa, Shirkadaas maamule maka noqonkaraa.

Iskuulkaas Macalin malooga baahan yahay . shaqo xagee lagu sheegay aan u shaqo tagee, ayaa ii muuqato in eey aad ugu mashuuleen wiilasha iyo Gabdhaha eey wax soobareen. intaas eey ku mashquuleen waa wax fiican balse Diinka intaas waa ka balaaran yahay.

AHABTA Xizbi lagu biiro ama laga baxo kuma koobna .

Diinta waa mid Nolosha oo dhan ku wada baahsan.

Jaamacado hadii eey kasoo qalin jebiyeen ama kasoo qalinfuleen.

Ururka ISLAAXA . Buugaagta eey Ardaydooda qoreen maxaa loo arki waayay ?.

Muuqaalo tayo leh looga hadlaayo Diinta.

Gabar codkar ah ama Wiil kasii daran oo dhankooda ka tirsan maxaa loo waayay?.

websaad tayo leh sida .

Nuuraliimaan.com

manhagonlin.com

nasiixa.com

weysaadyada Soomaalida ugu caansan

mid la tartami karo maxeey u sameeysan waayeen.

kaasoo lagu faafiyo barashada DIINTA.

TV. ama Idaacad.

Buugaagta AKHWAANKA eey qoreen ha tarjumeen hadii eeysan soosaari karin mufakiriin la tartami karto

DR.DHAARIQ SUWEYDAN.

AL qaradaawi.

Maxamad Algazaali.

DR.maxamad camaara.

Shakiib Arsalaani.

C/ wahaab Almasiiri.

-Cali Cabda raaziq.(Ninkii Buugiisa laga qeyliyay.Calmaani waaye ninkaas)

Muxamad xamiidulaah.(ninka qoray Buuga majmuucatal wathaa`iq al siyaasiya lil cahdi nabawi)

sanadka markoow ahaay 2004 su`aashaas mid lamid ah waxaa is weeydiiyay weriye FAHAD YAASIIN.

sanadka 2026 ZEEYLAC-BAALI ayaa soo celiyay isla su`aashaas. ISLAAX maxoow uqabtay SOOMAALIDA.

Buugaag laqoro, Maqal ama Muuqaal. marka laga soo gato Iskuulo iyo Jaamacado.intaas la arkaa loona jeedaa

Ardayda eey soo saaraan waxeey ubadan yihiin

reer Aduunyo.tilmaamahaas sare ka muuqdo ayeey leeyihiin.

-Cinwaanka Yuutub. minasat fastamic.

cinwaankaas waxaad ka heli kartaa Buugaagta eey qoreen Ikhwaanka iyagoo maqal ah balse waa Afcarabi.mp3.

ma hubo dhab ahaantii in eey yihiin Akhwaan cida leh cinwaankaas balse Buugaagta Akhwaanka ayeey faafiyaan.

-Ururka Islaax ee Soomaaliya waa sida aan kor ku xusay xog badan kama hayo mana ogi hadii eey jiraan Buugaag Afsoomaali ah oo eey qoreen.

marka aan Maqaayada iskugu nimaadno fadhi kudirir baan ku heeynaa halkaas.

AKHWAAN ayaan ahay ama ISLAAX

--

CAADIFAD HAWIYENIMO cidna duudka loogama raran karo hadeer. DAAROODNimo ayaa lamid ah.

shalay Kismaanyo Mareexaan iyo Ogaadeen

ayaa ku loolamayay.hadeerna Axmadeey ayaa yimid shaati

Diineed soo hagoogtay una diidan Mareexaan xakunka.

mudo 13 sano aniga lee tacbi aqaano. ayoow taagan yahay .

waxa lagu nacay wadaadka ayeey KOOW ka tahay xakun jaceeylka.kali taliska.

kuwa DUURKA galay waa lamid.

DOORASHO waa sheey xaaraan ah agtooda. SHUURADA casharradeeda. sidee ku ansaxdaa kuna burtaa lama baro barbaarta balse sidoow Islaamka uga burayaa qofka Kenya joogo ama Soomaaliya ayaa ala barayaa.

si hantidiisa berito loo xalaashado.

-sida Ninkii Ariga ka dhacay Ninkii miskiinka ahaay ee Muslimka ahaay.

waa dilay kadibna Hantidiisa ayoow ka dhacay.

Nabiga ayaa loosheegay qisadaas Qur`aan ayaana kasoo degay.

QISO: ayaan halkaan ku qorayaa waxaana kasoo dheegtay Buuga "NIDAAM AL MULK"

400 Hijriga ayeey dhacday.

Ciraaq. Eeraan. ilaa Bakistaan dhulkaas ayeeyna ka dhacday.

-Nin waziir ah ayaa waxoow booqday magaalo.

waa lagu soo dhaweeyay magaalada. waxoow arkay qasri meel ku yaalo waxaana leh Wadaad caalim ah aad u cibaado badan. wadaadkii ayoow u martiyay kadibna halkii ayaa lagu soo dhaweeyay . wadaadka waxoow ku dhex cibaadeestaa qolyar.

Ninkii waziirka ahaay waxoow soo iibsaday Sanam yar iyo debkii Sanamka loo shidi lahaay. waa soo qaaday waxoow dhex dhigay qolkii oow sheekha ku dhex cibaadeeysanayay xalay .Waziirka askar ayoow u qeeylo dirsaday waxoow amray in la qabto Sheekha ,waxoowna ku eedeeyay wadaadkaan waxoow caabudaa SANAMKA meesha dhex yaalo. aniga ayaa xalay u martiyay kana marqaati ah. hala qabto hana loo geeyo BOQORKA.

Sheekhii caalimka ahaay garbaduub ayaa loo xiray waxaana loo kaxeeyay dhanka CAASIMADA.

Boqorka ayaa la horgeeyay arinta laguugu eedeeyay bal kawaran ayaa layiri?.

inta ku qoslay ayoow yiri waxa aan ahay dadka caamada ah ayaaba og Waziir meel fog nooga soo martiyay warkiisa iga daaye wax xaqiiq ah miyaa la hayaa oo leeygu eedeeyay?.

Boqorka ayaa waxoow uyeeray Waziirka.

runta iisheeg una dhaaro maxaa kuugu kalifay in Wadaadka miskiinka ah aad masabidatid.

si aan u dilo. bal iiga jawaab ayaa layiri Waziirka.

isna waxoow ku jawaabay waa run aniga ayaa been ka sheegay Wadaadka, waxaan rabay in Qasrigiisa hadiyo ahaan ii siisid markaa dishid kadib.

-Qisadaan iyo Qisada Nabiga qabsatay waa isku mid.

ninkaas Askariga ah waxoow dilay Nin Ari la joogay.

kaaga darane Ariga isaga ayaa la wareegay.

-Qofka la dilay hadoow yahay nin miskiin ah oo hantidiisa la boobay isagana la dilay. baaris ayaa furan SHUUTE & LIIBAAN ayaa ku shaqo leh hoowshaas.

-Qofka dhintay haduu yahay Tuug askariga weerar ku soo qaaday oo lagu dilay goobta isna waa la baarayaa.Boolis ayaa ku shaqo leh. loo carbiyay hoowshaas.

Wadaadka Cilmiga denbi raarista waa ka qaday Minhaajka Nawawi qoray ayaa igu filan ayoow dhahayaa.

-Dilka Jamaal Kashoowkhi

-Wadaad garsoore ka ah Sacuudiga cimaamadna huwan & mid

CALMAANI ah oo TURKI ah

waxeey wada baarayeen qisada Jamaal Kashoowqi.

Calmaaniga qaabka oow qisada u qoray ayaa DIINTA udhaw xaqana waa sida oow Calmaaniga sheegay. kan Sacuudiga ka yimid Diinta waa baalmaray

kuma dhaqmin Cadaalada.sidaasna aniga ayaa dhahay.

-**Jamaal waa dhintay** haba dhinto balse Dalka Sacuudiga in ladumiyo oo halqof darteed loo dumiyo sidaas xaq miyaa?

maya waaye jawaabta.

Weriyayaasha ku sumooway CALMAANIDA.

Danta sare ee Umada leedahay aanan waxba ka aqoonin

waxeey dhahayeen ha dunto hadeey rabto.

Doowlada Sacuudiga reerka oow ka dhashay Khashoowqi waxeey siisay SILSILADO Dabaqyo ah waxaana lagu wareejiyay wiilka oow dhalay isaga.

waxba waxbeey dhaamaan.hal qof dartiis in Dalka u dumo waxaa dhaamo diyo qaadasho.

-aniga waxaan dhihi lahaay sida Cumar sameeyay hala sameeyo, hana la joojiyo Diyada eey kala qaataan Qabiilada. qofkii kas wax u dilo hala dilo.

Cumarba waa ha kiyay xadka ku qoran Qur`aanka. abaar jirtay ayoowna u hakiyay.

-Diyo qaadashada Doowlada daaqada haka saarto. Qabiilka diyo maqaadan karo, qaanuun waa laga dhigi karaa sida Cumarba u baal maray Aayada.

-Dhiiga oo la daadiyo markoow ciyaar noqdo qodobada ugu xanuunka badan ayaa lagu xakumaa midka wax dilista bartay.

HARGEYSA waxa nabada ka dhigay mudo 30 sano ah waxaa koow ka ah cafis majiro.

qofkii dhiig daadiyo isna dhiigiisa waa in oow daataa.xitaa hadoow u rooro dibada waa looga dabategayaa.

qof walba Qabiilkiisa waa mid Qaamuuska ku dhigan mana qarsoomayo. Odayga reerka waa ku qasban yahay in oow xabsiga dhex keeno wiilka wax dilay LIINTA waa in oow ka cabaa halkaas.

Qaadka ama JAADKA lacunayo hadii xanaaq laga qaadayo Wiilka ISAAQ ah ayaa inta xanaaqo qof walba wadada weri lahaay balse cagacan cabsato waxa u yeelay ayaa ah LIINTA Xabsiga kaga horeeyso. cid ka soosaari doonto amaba cafis wax la dhaho kama jiraan halkaas.

Wadaadka waa in laga xoreeyaa Doowlada. sida Calmaaniga xor uga yahay Dowlada.

waxoow doono baaris haku sameeyo Wadaadka.

qof waxoow doono qori karo halaga dhigo Culimada.

hana lagu qadariyo qof walba taqasuskiisa.

-Dhaqtarka siiba midka caloosha ku taqasusay isaga ayaa bukaanka daweeyn karo , balse aniga hadii aan dawo u qoro, denbi ayaa ka galay dhanka Eebbe. waayo ma baranin dhaqtarnimo.

{baraarujin. qisada Waziirka masabiday wadaadka dusha ayaan ka qoray Buuga ima hor yaalo hadeer. hadii aan kala hor mariyay ama aan wax qalday yaanan la ii qabanin nuxurka ayaan idinla wadaagay}

#Qofka inta la dilo hantidiisa la dhaco.

Qisadaas aan kasoo waramay iyo Qisada Nabiga qabsatay waa isku mid.

ninkaas Askariga ah waxoow dilay Nin Ari la joogay.

kaaga darane Ariga isaga ayaa la wareegay.

hadeer waxaas Aduunka kama jiraan Askariga hadii oow qof

meel iska socday inta dilo Gaari ama Guri oow qofkaas lahaay kala wareego.

Doowlada ayaa la xisaabtanto.

is bedelka ku dhacaayo qof walba hantidiisa.

Wazaarad la dagaalanto Musuqa

ayaa loo sameeyaa

Doowlad walba oo aduunka ka jirto sidaas ayaa u dhaqan ah.dhaqanka Dhalo cadeey ayaa looga dhaqmaa Aduunka. siiba Dunida hormartay.

Doowlada ayaa la xisaabtanto Askariga iyo Siyaasiga mid xilka ka degay ama midka xilka qaban rabo hadeer.

hantidiisa mida dibada utaalo sida ISLII Guryaha oow ka dhistay. mida oow ku dhex leeyahay Hargeysa ama Xamar.

hantida Umada inta laga xado Xamar & Hargeysa & Boosaaso ISLII laguma dhisaayo.

Buugaas waa soo xirmi doonaa goor dhaw.

xitaa Wiilkaaga haduu degan yahay dibada ,waziir kama noqon

kartid Dalkaan. heerkaas waa lagaari doonaa.

iskaba daaye nin Baasaboor ajnabi ah wato in oow waziir ka noqdo Dalkeena.

-Qurba joog qof neceb ma ihi balse in Dalka laga xakumo Qurbaha midaas waxaa diidan damiirkeeyga. Dal shisheeye ayaanan la jecleeyn in Doowladiisa dal kale laga dhex maamulo . Umadeeyda sideen ugu quurayaa in wiil ama Gabar Qurbaha ka soo shaqo tagtay eey ka tacabto hanti.

weliba 4 sano qofka xil haayay hadana Qurbaha ka dhisanaayo dhoowr Qasri.

Qalinka wax uga sheegi karin iskaba daaye TV-ga ama Idaacada.

qof aanan waxba Umada ka qiyaanin balse daacad ugu adeegay midkaas kama hadleeynin yaanan qalad loo fahmin hadalkeeyga.

-hadeerna waa qasab in QURBA JOOGTA Dalka xakumaan waayo cilmiga Doowladnimada casriga ah iyaga ayaan u daba fadhinaa ,inta laga helaayo jaamacado tayadooda sareeyso loogana maarmayo Siyaasiga dibada nooga yimid.

==========

(1)Maqaalka waa mid furan cid walbana aqrisan karto Gaal iyo Muslim.

sir ma ahan si hoose in cid gooni ah loogu sheegi rabay.

Askari Soomali ah, kana tirsan Meleteriga hadoow aqriyo

Maqaalka. waxaan udirayaa hoowl.hasoo aqriyo

Buuga "Siyaasatnaama"ama NIDAAM AL MULK.

buugaas MP3 waad ku heli kartaa Nedka ayaa lagu baahiyay PDF isagoo ahna waad ka dhex heli kartaa.

ninka qoray waa Nin askari ah. dhulka oow maamulay waxoow ka baaxad weeynaay Yurub dhulka eey ku fadhido dhamaantiis oo leesku geeyay. ninkaas Askariga ah Buugiisa waa mid la taxriifiyay balse waxaa kamuuqato in oowasan Diinta waxba ka aqoonin FIQHIGA waxoow ka ahaay 00000.

qofka nuucaas ah ayaa Askari ah Dal dhan ayoowna maamulayaa.

==========

xuska Weriye.

C/SHAKUUR MIRE AADAN.

1960-2015

Naqdin&amaan

Waa ninkii qoray

" Buuga :kobaca islaamiyiinta Soomaaliya.1952-2002."

-Ninkaas qaabkee loo dilay?.

Hotel Muqdisho ku yaalo ayeey ku dhex **qarxiyeen**. 2015.

Dad badan ayaa kula dhintay halkaas.(1)

-Naqdi.

Weriyaha sal ahaan QARDHO ayuu ka yimid .Doowladii Cali maxamad ee Kenya laga keenay. miyaa qarash ku siisay qorista Buugaas?.

Maxaa kusoo beegay soo ifbixida Buuga. daabacaada 1-aad. sanadka 2011

daabacaada 2-aad sanadka 2013

Siyaasiyiinta waxeey maal gashadaan Weriyayaasha midaas halagu baraarugo.

CIRRO , hadeer waxoow ka dhex hadlayaa Weriyayaal.

markaan arko waan ku qoslaa. Dadka caamada ah sida Hooyada aanan siyaasad waxba ka aqoonin ee Garoorka Suuqa

la fadhido, Idaacada intaad kala hadashid maankeeda waad xadi kartaa.

wixii Buugaag la qoray aduunka Gaal iyo Muslim wexeey qoreen qofka soo aqristay.oo weliba maalin walba wax cusub maankiisa lagu sii biiriyo. Weriye Sharuur soo qaatay ayaanan maankiisa wax ka bedeli karin.

Qof manhaj gaar ah watana ma iibsan karo maanka dadka garaadkooda kobcay ama koriinshaha ku socdo.

-marka aan wax qoraayo waxaan ogahay in eey jiraan Rag & Dumar iga aqoon badan .inta aan aqaano markeey ila dhaafto weey iga dhamaatay Ayaan dhahayaa. Kursiga gadaale Ayaan fadhiistaa. dhageeste fiican ayaa u noqdaa midkii iga aqoonta badnaay.dib Ayaan ugu soo laabtaa masraxa anigoo dhahaayo ii baneey markeeyga ayaa la gaaray dardar Ayaan kusoo galaa masraxa.anigoo weliba soo nastay. AAMUSNAANTA ayaa nasasho ah. waagii hore Soonka Rabi nagu waajibiyay waxeey ahaan jirtay aamuska.Maryama iyo Nabi Zakariye. waxaa lagu waajib yeelay Soon laga soomo hadalka. SUUFIGA waxoow ardayga ku waajibiyaa AAMUS. waana SOON.

meel fadhiiso Tusbax qaado Quraan aqri ama werdi ayoow ku waajibiyaa. kadibna NUUR ayoow ka helaa dhanka Rabi waxaa laabtiisa laga xalaa xiqdi, xasad, xan, iskudirka dadka, wax walba oo akhlaaq liidato ah ayaa laga dhaqayaa kadib ayoow noqdaa Weel xamili karo XIGMADA.

(waman yutal xigmata faqad ...)

==========

Buuga :kobaca islaamiyiinta Soomaaliya

Ninkaas Buugaag kale miyoow qoray?.

markii aan baaray waxaa iisoo baxday Buugaag dhanka JACEEYLKA ah in oow wax ka qoray balse dhanka FIKIRKA wax oow ka qoray ma aanan arkin.

dhinaca DIINTA ayaan ula jeedaa.

dhinaca FIKIRKA. marka laga hadlaayo Buugaas wax aanan eheeyn lagama dhaxlin Weriyahaas.

weey jiraan Qoraalo kale, SIYAASADA ayoow wax ka qori jiray

balse wax la daabacay oo maanta suuqa laga heli karo ma ahan.

dhibka Qoraaga Soomaaliyeed heesto ayeey kamid tahay.

maalinta oow Qabri galo ayaa dadka ugu wardanbeeyso. halkaas ayaa lagu ilaabaa. ninkaan Weriyaha ah hadeer cid warkiisa hadal heeyso ma aanan arag.
10 sano kabadan ayoow Janada iska dhex joogaa.
iilka dhex jiifaa .

Iilka qof aaminsan maba idiin soo qorin qoraalkaan.
CADAABUL- QABRI majiro ayaan dhahay. qofkii dhintay JANO ama NAAR ayoow dhex jiraa.
Weriyaha JANO ayaan dhanka Eebbe uga rajeeyay waayo xaqdaro ayaa loo dilay.

-qofka doonayo in oow Aduunka ka dhex taago TAALO weeyn oo xusuus ah, wax haka qoro FIKIRKA. sida IMAAM AL-GAZAALI. ha noqdo.
balse marka aad waqtigaaga ku dhex dishid **Madaxweeyne CIRRO** ama **Cali maxamad Geedi** ama **Xasan sheekh.**
marka iyaga laga maarmo adigana halkaas ayeey Soomaalida kaaga maarantay.
-Weriye Fahad yaasiin waxoow in badan ka hadli jiray doowladii Cali maxamad Geedi.

aad ayoow wax uga qoray, Qalinkiisa qadiisa halkaas ayoow ku qasaariyay . maanta qofkee jecel in oow waxaas lasoo dhaafay milicsado, taariikh beey noqdeen. sax ama qalad wixii lasoo maray waalaga soo gudbay.

-adiga iyo anigaba SHEEKO ayaa nahay laga sheekeeyo. Abwaan HADRAAWI maanta ma noola SHEEKO waaye.

aniga SHEEKO ayaa noqon doonaa markaan Iilka galo. adigana ila mid ayaa tahay.

Imaam Al-Gazaali sheekada ayoow ka mid yahay. dhamaanteen SHEEKO ayaa nahay. waxaa haboon in aan si fiican usheekeeyno. waxa aan ka sheekeeynay ha noqdaano wax aanan laga maarmin sida BIYAHA ah ama Qoraxda ama Cuntada . wax mar walba laxiiseeyo aan ka hadalno. JACEEYLKA , waa jirayaa inta eey nool yihiin NIN&NAAG.

-Buuga XUSUUS CAASHAQ.1987

-Buuga DHALANTEED JACEEYL.1988.

Filimka **Eedeysane** 1991

==========

Dagaalka ereybixinta.(1)

hebel weey qarxiyeen.

ereybixinta QARXIN waxaad moodaa in laga guuri rabo qaabka loo adeegsan jiray.
hebel weey qarxiyeen Gurigiisa ayeey ku dhex qarxiyeen .
sidaas ayaa erey bixintaas loo adeegsan jiray . 20-kii sano ee udanbeeysay.

hadeer CIYAAL XASHIISH waxeey bilaabeen in eey erey bixinaas ku dhex ciyaaraan si loo qariyo xanuunka loo geestay Umadeena. Hilbaha Hooyooyinka ee Suuqa weran ZOOPE. SHAAMOOW. HARGAHA iyo qaar kale oo kasii badan qaabka loo sootebiyay warbixintooda marka la rabo in wax laga bedelo
Doowlada waa in eey wax ka bedeshaa balse ciyaala suuq in oow erey bixintaas la wareego oowna qaabkale u fasirto waa wax xanuun badan.

bal waxaad qiyaastaa 1000 sano kadib qofka dhalan doono qaabkee ayoow u fahmayaa erey bixintaas labada qaaba loo wada adeegsaday?.
-Doowladii Reer Umaya waxeey diideen ilmaha in loo bixiyo magaca CALI.

denbi ayeey eheeyd midaas.CULAYA ayaa loo bixin jiray canuga la doonayo in Imaam Cali lagu samiyo. waana magaca CALI oo laxan la saaray.

CUMAR iyo Camaar waa iska agdhow yihiin.

-Doowladaha Reer Galbeedka waxeey diidaan HITLER in loobaxsho Wiilka.

Dagaalka ereybixinta.

1850-1950.

Caruurta Gumeestaha ku hoos barbaaray waxaan ku naqiinay in eey caayaan Beerfalashada .Dhulkeena Dhoobeeyda ah waa halka ugu dahabsan. damaca Gumeestaha ayaa ahaay in oow dhulkaas la wareego.

si oow ula wareego ayoow faafiyay in la caayo Beeraleeyda.

Dagaalka ereybixinta. 2026

Dal xoreeye Xasan sheekh & waziirkeena

1-AAD Xamze.

waxeey xooga saareen Shidaal qodista.

Shidaalka FUUSTO ayaa lagu shubi doonaa si loo iibgeeyo.

Dadkii wax magaratada ahaay waxaa afka loogu tiray
"FUUSTO AYAA LA RIIXAYAA "
erey bixintaas wax loola jeedo ma aqaano aniga, balse warxumeeyn ayaa looga danleeyahay.
 FUUSTO ama BARMIIL waa agabka aad Shidaalka ku shuban doontid marka la gaaro
xiligii aad maali laheeyd ceelasheena shidaalka.

CURAD-1

ayoow u bixiyay Waziir Xamse.
Dhiishii aad Caanaha ku shab laheeyd in aad sii culatid oo aad sii amaantid halkii laga sugaayay ayaadba caaysay.

Af-Carabi & Af-ingiriis
dagaalkooda.

Alwaquud. =Shidaal.
Qoryaha ama xaabada lashito ayeey ka timid erey bixintaas.

-Oil=saliid.

Fuustada Shidaalka ah waxeey mareeysaa .100$.
-wershada sifeeyso Saliida ceeyriin=wershed sifeeyso shidaalka.
-Saliida ceeyriin waxeey suuqa kajoogtaa 120$.
-Birta ceeyriin waxuu qiimaheeda marayaa...
-Shidaalka ceeyriin halkii FUUSTO waxeey suuqa ka joogtaa 120$.
IDAAJAA ayaa Buug ka qoray arimahaas qofkii ubaahan ha aqristo Buugiisa.

Caruurta ciyaalasuuqa ah erayada eey curiyaan waxba yaanan la soo caanbixinin.

-Carabta miyaa ka danbeeyso soo ifbixinta ereyada qaar.maxaa hada ku soo beegay FUUSTO in la caayo marka la gaaray Shidaal qodista. riyadii Umada in laga dhabeeyo oo weliba maalkeena Seeylada keensano eey soo dhawaatay.
-Samatar ayaa ku heesay"*wax lurkeeyga jecelbaa intaa hoosta kaga lamaanan*."
Carabta in eey nasoo dhex gashay waxaa u daliil ah MUUSIGA qaabka loo garaaco Masaarida Heesahooda ayaa loo qaab ekeeysiiyay.

qaarkalana sida Sawaaxiliga. qaarna Hindiya.

SUUDAAN ayaan ka baranay Heesaha casriga ah sida loogaraaco, iyaga dhankooda ayeey macalimiinta nooga imaanjireen.

Doowlad hal meel saldhigatay oo jiheeyso dhalinyarada markii lawaayay ayeey midaan dhacday.

==========

SUUDAAN & BISHA SOOQAAD.

Dhaqan waxeey leeyihiin ah marka lagaaro xiliga SOONKA.

Xaafadaha deriska ah

Meel barxad ah oo weeyn ayeey dermo dhigtaan qof walba oo dariiqa maraayo halkaas ayoow kula afurayaa .deriska halkaas beey ku wada afuraan.

Guri hebel waxaa laga keenay Canjeero.

Gurigaas kale Bariis ayoow soo kariyay. Midkaasna Sanbuus ayoow soo dubay.

Kaas kalana Bejiye iyo Bursaliid ayeey Saxamo soo saareen.

Reerkaas xaga degan iyagana waxeey keeneen cabitaan aad u tiro badan .

Wiil walba wax gooni ah ayoow meesha keenaa.

Sidaas ayaa hal meel loogu wada afuraa. Sanad walba halkaas mar ayaa meeshaas leesku arkaa .inta kale mashquulka ayaa badan.

Deriska ayaa halkaas isku wada barto .sida **Hargeysa** ma ahan SUUDAAN oo dhoowr DAAMOOD loo kala degan yahay .

SUUDAANTA dhexdooda Dadka waa walaalo.

Xamar xiligii hore waxaa iska caadi eheeyd in aanan la aqoonin qofka Qabiilkiisa. qof 50 sano agtaada degan ayaadan aqoonsan Karin Qabiilka oow kadhashay .

ceeb ayeey eheeyd in aad qofka weeydiisid heeybtiisa hadii oowsan isaga kula soo doonanin. SUUDAANTA waa lamid.

Hebel gobol hebel ayoow ka yimid in la dhaho waa iska caadi balse Qabiilkiisa in lasoo hadalqaado waa wax ceeb ka ah agtooda.

SHEEKH ALMIS & Culimadeena HARGEYSA halka eey noo wadaan waa halkaas.

meel aanan reero loo kala deganeeyn.

balse qof walba halka oow Guri raqiis ah ka helaayo, shaqo sharaf leh ku heesto ayoow degayaa. maxaa igu lug xiray Qabiilka in aan agtooda ku qofolnaado. meel raqiis ah adigoo arkaayo maxaa ku qafiifiyay oo kugu ag qofolay Qabiilkaaga halka oow ku badan yahay.baqdin beey kukala beereen Dadka.kolkaas beey Daamo-daamo u kala dejiyeen.
qof walba dantiisa halka eey ku jirto ayoow la jaar noqon doonaa.

SALAM STUDIO.TV.

-SHEEKH ALMIS.
-SHEEKH RAKUUB.
dhamaan maamulka SALAAM-STOUDIO.
hoowshaas barakeeysan Sidaas waa in eey ku wadaan .
Buug walba oo fikir ah haloo aqriyo Bushadeena .
SUUDAANTA Sida eey
Cunto kala nuuc ah uga wada heleen afurka bisha SOONQAAD waa in Buug walba agtiina laga helaa.weliba aad xooga loosaaro dhanka SIYAASADA.

Dhiiga Umada Soomaaliyeed waxa loo qubay waa SIYAASAD darteed.

Buugaagta FIKIRKA ka warantay halaga haqabtiro Umadeena.

Qofka marka oow wax wanaagsan Umada u qabto waa loo mahadnaqaa.

Bogaadin & hanbalyo. ayaan Buugaagta idiinku dhex qorayaa.

1 Milyan oo Soomaali ah kuwii fariinta gaarsiiyay allaha idinka dhigo.

-Abwaan GAARIYE ayaa ka gabyay arimahaas.

Soomaalida marka aad dhimatid ayeey ku amaanaan.

waxuu yiri (*halaguu ilmeeyee horta dhimo af maahee*..)

-**Abwaankii Habar yoonis** Xaaji Aadan .

{digniin: qofka iinta oow leeyahay naanees in looga dhigo akhlaaq liidato waaye.)

wuxuu yiri markoow Suufiga ku dhega hadlaayay wadaadka SUUFIGA ah markoow dhinto ayaad Xoolo u qashiin markoow noolyahay hal kaniini uma quurtiin agtiina ayoow fadhiyaa isagoo aad uliito.nuxurka gabayga ayaa sidaas ahaay.Buuga laga qoray Gabayada Xaaji aadan ka aqriso.

MADASHA.

SALAM STUDIO.TV.

JAMAALADIIN Al afgaani. **Maxamad Cabdu**. Sheekh **Rashiid Rida**. ‘majalada Almanaar.1920-1950.’
Booskaas kuwii Umada u buuxiyay in aad noqotiin Ayaan idiin rajeeyay.GUULEESTA.

-anigana waxaan ahay Arday gadaal fadhido weliba Kursi gaaban
Soo jiitay. markeey noqoto SIYAASADA.
& arimaha Dhaqaalaha.
-Dalka U.S.A. & KENYA & HARGEYSA.
Sil-silad idinkoo ah ayaa suuqa soo gasheen.
Abuu Jahal haduu Itoobiya naga xiro Asmara ayaan kasoo hadleeynaa.
Dalka TURKIGA xafiis ka furta hana laga faa`iideesto XORIYADA HADALKA.
1400 SANO in Siyaasad laga hadlo mamnuuc ayeey ahaan jirtay.

Kitaabka SAFIINADA & USUULU SALAASA looma baahna in Umada loogu soocel-celiyo oo aanan Juz CAMA lala dhaafin barashada Quraanka.

==========

==========

==========

==========

==========

#QAADYAANIGA.

aqristoow ka raali noqo maqaalka qeeybtiisa

4-AAD

waa buuxsamay, Siyaasad iyo arimaha Soomaalida

ka hadalkooda ayoowna la buuxsamay.mana halmaamin MERZA & Xasan Daahir in aan ka hadlo dib ayaan u dhigay.balse waa hore ayaan qoraalkooda diyaariyay dib u eegid ayaa iigu dhiman balse waan diyaariyay qormo ahaan.

MERZA GULAAM Axmad al qaadyaani

Waxoow kudhashay magaalada qaadyaan

sanadka 1835.

1908 ayoow kudhintay Qaadyaan.

FIKIR AHAAN IS BEDELKA KU DHACAY .

-1890 waxoow ku dhawaaqay in oow yahay.MAHDI.

Masiixa la sugaayay oo soothaahiray in oow yahay ayoow sheegay.

waxoow yiri Nabi Ciise waa hore ayoow dhintay.

MAHDI ayaa dhiman in oow udhasho Umada Nabi Muxamad waana aniga. Magac kale ayoow leeyahay MAHDIGA waana MASIIX .derejadaasna aniga ayoow Eebbe isiiyay mid dhanka Rabi laga soo diray ayaan ahay .waa intaas nuxurka hadalkiisa.

Merza fikir ahaan maxoow ugu dul wareegayaa Nabi Ciise waa dhintay?.

Merza waxoow rumeeysan yahay Ninka Tiirka lageeyay in oow ahaay Nabi Ciise. midaasna waa gaalnimo.

Balse isaga waxoow gaalnimo ka dhigayaa Nabi ciise madhimanin qofka dhaho.

-Su`aal?.

Ninka Tiirka la geeyay ee la toogtay Nabi Ciise miyoow ahaay?.

-jawaab.

وَقَوْلِهِمْ إِنَّا قَتَلْنَا ٱلْمَسِيحَ عِيسَى ٱبْنَ مَرْيَمَ رَسُولَ ٱللَّهِ وَمَا قَتَلُوهُ وَمَا صَلَبُوهُ وَلَـٰكِن شُبِّهَ لَهُمْ وَإِنَّ ٱلَّذِينَ ٱخْتَلَفُواْ فِيهِ لَفِى شَكٍّ مِّنْهُ مَا لَهُمْ بِهِ مِنْ عِلْمٍ إِلاَّ ٱتِّبَاعَ ٱلظَّنِّ وَمَا قَتَلُوهُ يَقِيناً

[Nisa 157]

وَمَا قَتَلُوهُ وَمَا صَلَبُوهُ

Halkaas waxaa ku cad in oowsan isaga eheeyn ninka laxerxeray

ee la geeyay Tiirka.

-Nabi Ciise & CADAABTA QABRIGA.

Masiixiyada iyaga waxeey dheheen Nabi Ciise ayaa noo denbi dhaafay isaga ayaa galay Naarta.

-Waxaan isweeydiiyay hadii aan u raacno tooda xageey ku taalaa Naartaas oow galay Nabi Ciise ?.

-jawaabtooda waxeey tahay .

Godkii lagu riday ninkii loo ekeeysiiyay Nabi Ciise, halkaas ayaa Naar looga dhigay .

2 maalin ayoow ku jiray halkaas. warkaas war u eg ayeey dheheen KIRISHTAANKA.

CADAABTA QABRIGA halkaas ayoow salka ku haayaa.

DIINTA MASIIXIGA ayaana laga soo minguuriyay. Diinteena Muslimka siiba Qur`aanka. wax asal ah kuma lahan CADABTA QABRIGA. balse Naar & Jano ayaa ku qoran

qofka dhintay in eey hursantahay.

-FALSAFADA GIRIIGA SAAMEEYNTA EEY KU YEELATAY MASIIXIYADA. kadibna Muslimka ayeey ku dhex faaftay.

-Buugaagta Feeyla suufyada Giriiga siiba.

AFLAADHOON+SUQRAADH

qofkii dhageeysto (MP3 ama PDF ayaad ku heli kartaa Afcarabi ama Ingiriis.nedka waa ku jiraa.17 saac oo dhageeysi ah .)

waxoow ogaanayaa in Diinta Masiixiyada asal ahaan laga -soo minguuriyay Feeylasuufyada Giriiga.

-Axaadiista Nabi Muxamad waxeey ka dhex buuxiyeen quraafaadkii Diinta Masiixiyada laga dhaxlay . asal ahaana laga soo minguuriyay GIRIIGA.

waxaad arkeeysaa Xadiiska Nabiga. isla sheekadaas mid lamid ah ayoow kaaga sheekeeynayaa AFLAADHOON.

Nabi Muxamad ma aqrisanin Buugaagta Giriiga mana soo koobiyeeynin balse halka eey naga soo gashay waa MASAR.SUURIYA.FALASTIIN YEMEN kuwaas Diintoodii Masiixiyada eheeyd ayeey nooga dhigeen XADIISKA Nabi Muxamad.

-waxaa MIIZAAN inoo ah Qur`aanka .xadiiska hadoow qilaafo Aayada halkiisa ayaan ku hakineeynaa. Aayada ayaan ku dhaqmeeynaa.

Qaacido waxaa noo ah Qur`aanka.

wax walbana qofka waa cafin karaa.

Qof la dilay hadii diyo laga qaatay wax walba oo DILKA ka hooseeyo waa wax laga heshiin karo.

aan dib ugu laabano QISADII NABI CIISE.

-NABI CIISE waa nool yahay oo maba dhimanin

Doodaas waaba taageeri karaa lana duuban karaa qoladaas.

weliba mad-habtaas waan uhiili karaa.

Rabiga Asxaab al ukhduud nooleeyay cunto la`aan mudo 300 oo sano.

Nabi Ciise miyoow Samada ku dhex nooleeyn kari waayay 3000 oo sano wax ka badan?.

Awooda eebbe qofka aaminsan madiidi karo sidaas.balse in leesku gaaleeysiiyo ayaa xun. wax naga maqan waaye waxa aan ka hadleeyno, waana cilmi aduunyo balse ma ahan cilmi aakhiro.

Imaam Al-GAZAALI Fiqhiga waa cilmi aduun ayoow dhahay. DAJAALKA imandoono & Nabi Ciise.

wax walba oo makhluuq ku saabsan waa cilmi aduunyo. hebel aduunka ayoow joogaa ama majoogo ee waa dhintay waxaas ayaa laga doodayaa.hebel waa makhluuq hadana dib ayoow

Aduunka ugu soolaaban doonaa.

DAJAAL & Nabi Ciise waxaas waa cilmi aduunyo Ardayga ha ogaado midaas.

-NAARTA xageey naga xigtaa dushaas sare mise Dhulkaan dhuumahiisa hoos u qodan.

(asfala saafiliin)

Naarta Hoos beey naga xigtaa.

-Nabiga markii cirka loo dheelmiyay Naarta soow kuma soo arkin halkaas?.

Gaalka albaabada Samada looma furaayo sow lama dhihin.

halkaas waxaa ku buray DHEELMINTA.

Cirka looma qaadin Nabiga balse dhulka ayoow ku safray Qudus ilaa MAKA.

intaas maba dhaafin Nabigeena.

Naarta oow kusoo arkay dusha sare wax jiro ma ah warkaas.

Dheelminta qaabka eey udhacday markale ayaan ka ahdli doonaa.midaas meel iigu haay hadhoow baan usoo noqon doonaa.

Hadraawi soow kuma heesin

Aakhiro Weey aasantahay.

gabay gii SIILNLEEYDA ku jiray.

وَإِن مِّنكُمْ إِلاَّ وَارِدُهَا كَانَ عَلَىٰ رَبِّكَ حَتْماً مَّقْضِيّاً
ثُمَّ نُنَجِّى ٱلَّذِينَ ٱتَّقَواْ وَّنَذَرُ ٱلظَّالِمِينَ فِيهَا جِثِيّاً

[مريم71/72]

Aayadaas

Aakhiro ayaa loola jeedaa balse Naarta ma ahan

waxa oow Eebbe ka hadlaayo.

dhamaan Aakhiro waa loosoo arooraa waaye sheekada kadibna Muuminka waan badbaadin doonaa.

(inaka mayitun wa inahum)

Aayadaas ayeey lamid tahay.

لَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَانَ فِيٓ أَحْسَنِ تَقْوِيمٍ

ثُمَّ رَدَدْنَاهُ أَسْفَلَ سَافِلِينَ

[التين]

Dadka waxaan ku dhex uumay Janada kadibna waxaan udhaadhiciyay meel hoose, halka ugu hooseeyso ayaan geeyay markeey danbaabeen .

ثُمَّ رَدَدْنَاهُ أَسْفَلَ سَافِلِينَ

Bal ufiirso IILKA nala dhigaayo.
meel hoose waxaa ah Aduunka aan ku dul noolnahay.
waxaa aad uga sii hooseeyso IILKA. isagana waxaa kasii hoos ah NAARTA Jaxiimo.

أَسْفَلَ سَافِلِينَ

halkaas ayaa ah .

-

Rabi ayaa Samada meel ka sareeyso noo qaadayo.

JANADA ayoow dib noogu celinayaa waa hadii aad tacbano.

qof aanan shaqeeysanin lama abaal mariyo.

AHLAL QUR'AAN.

C/qeeys & Hadraawi

Aakhiro & Jano & Naar.

xagee beey naga xigaan ayeey Suugaan ahaan isku weeydiiyeen Hadraawi isagoo ka jawaabay waxoow tiriyay.

GABAYGA

Arag maqal ama Araxmaan.

Ergaduu farriintiyo Ku adkekeyey heestee Egmadaanu kulanoo Looxii ilhaankaamkaan Sida uurku baalaha Indhahayga saaroo Warku waa ammaanee Adna Maxamed Moogow Aakhiro halkay

tahay Cabdi Qays ogeysii Ayaadaha Qur'aankiyo Araxmaan sidey tidhi Hadalkii Illaahay Ruuxuu Islaamii Sida uu aqoonsaday Waa ooman hawdoo Waa guri abeesoo Adeg weeye hoosoo

Abataq ku yaaloo Waa iil madow oo Rabbigay adoomaha Kaga aar gutaayoo Waxa laga arooraa Irridaha xabaashoo Anban maayo ruuxii Qabri lagu adkeeyaa Marna oogadeeniyo Waa oosha guudkoo Waa beer udgoon iyo Duni wada ilaysoo Waa ceel irmaaniyo Togag wada ordaayiyo Ilo wada xareedoo Lagu oon baxaayoo Naftu eegmo sugashada Ashqaraar ka qaadoo Toddobaatan ooryood Lala aqal galaayoo Rabbigay addoomaha

Ku abaal marshaayoo Dhibta lagu ilaawaa.

Afhayaha barbaartow Ababshaha dhallaankow Taliyaha abwaankow Aabaha jacaylkow Adigoon ogeyn baan Uurkaaga baadhoo Ula jeeddadaadaan Ka arkaa dhul dheeroo Arrintaadu Qaysow Af gobaadsi weeyee Aakhiro Cabdow Way aasan tahay Iilkay jirtaa Aakhiro Cabdow Anbatoo luntoo Ururkiyo laxaa

Ku ag-xidhantahee

Dadku yuu ku eedayn Ha dhex gelin ammuuraha Isha xidho afkana dhawr Arag maqal warkana ood.

==========

#**Abwaan YAM-YAM** & Suugaantiisa Aakhiro.

{aqriso :MAQAALKII DENBI DHAAFKA.2024 .halkaas waxaa ku qoran qisooyin aan ka alifay isagoo Janada dhex degan Abwaanka. sheeko ayaa dhex martay isaga iyo Hadwaari .maqaalkaas waa midka aan ugu jeclahay inta aan qoray. waayo Janada ayoow i xusuusiyaa }

Shirkii CARTA 1999-2000.

CIILTIRE ISMAACIIL CUMAR GEELLE

25 sano kahor ayoow Umada iskugu shir.

intii wanaaga Soomaali la jecleeyd weey kasoo wada

qeeybgaleen

Mooryaantii Xamar & Boosaaso & Kismaanyo & Beydhabo

dhamaantood Qab-qabla yaashii kobaqaadyada u ahaay

ITOOBIYA. kama eeysan soo qeeyb gelin weey iska diideen.

shika Jabuuti.

in eey ka qeeybgalaan ayaa u wanaagsaneeyd waayo MAXAAKIIMTA waa laga maarki lahaay.
maantana kan joogo Kismaanyo sidoo kale Boosaaso iyo
inta ka dhex guuxeeyso Xamar. waqtiga in eey ka faa iideestaan ayaa u wanaagsan wadajir looheshiiyo.
shalay SHABAABKA hal ayoow ahaay koonfur ayoowna ku ekaay maanta iyagii ayaa sii qeeybsamay DAACISH ka dhex dhalatay.
Beelaha kala qoqoban Boosaaso, Hargeysa, Xamar, Kismaanyo waxaa u wanaagsan in eey ka faa-iideestaan xiliga.
ISAAQ dhexdiisa heshiis ah, Hawiye sidookale Daaroodna haka reebin Digil&inta daladiisa ku dhexmideeysan dhamaan Beelaha
in eey dhexdooda si dhab ah u heshiiyaan ayaa wanaagsan.

-Xasan Daahirka KHAWAARIJTA ah & XASAANKA Keenya

ka dhex caaytamo iyagana kama soo qeeyb gelin.

-Weriyaha KHAAKHLAHA ah & Warbaahinta Beesha

dhamaantood weey iska diideen in eey yimaadaan shirkaas.

Abwaan **YAM-YAM & SHIRKA CARTA.**

Gabay ama Hees ayoow nooga tegay. dhaxal waaye aanan la dhaafi karin .

hadii la soo hadal qaado AAKHIRO.

qasab waaye in la xusuustaa

Heesta oow qaaday SANKA.

"SAFAR BAA LA TEGAYAA "

aniga majecli Heestaas. aad baan uga argagaxaa markaan maqlo.

YAM-MAY markoow .U.S.A ku laabtay

Gaari ayoow shil ku galay OOHAAYO ayaana lagu duugay

dhoowr sano kama soo wareegin markoow Shirka kasoo laabtay.

SANAKA isagana waa la mid

dhaqso ayoow ku dhex dhintay Muqdisho.

Feeyla suufkii NABADA. Laashin GACAL XAAYOOW

isagana kama harin wax yar boow siinoolaay waa dhintay

dhoowr sano kadib markii CARTA lagu soo heshiiyay ee

leescafiyay.

heesta

"SAFAR BAA LA TEGAYAA "

mar dhaw waxaa cusbooneeysiiyay Fanaaka IIDLE-YARE.

isagaa dib usoo qaaday.

==========

==========

#AHLAL QURAAN

Qisada ISRAA WAL MICRAAJ

DHEELMINTII .NABIGA.

{QEEYBTA 2-AAD....MAQAAL KU SAABSAN URUR DIINEEDKA...QAADYAANI...}

QEEYBTA 2-AAD ee isla maqaalkaan ayaan si wanaagsan ugu soo dhex sharaxay waana sida aan aniga hadeer ku qancsanahay. wax ka qurux badan hadii aan ka dhex helo Qur`aanka dhexdiisa fasirkaas Quraanka ah ayaan u guuri doonaa .

qormadii ku qorneeyd qeeybta labaad ee aan qabyada uga tegay ayaan sii dhameestirayaa hadeer.

MERZA GULAAM AXMAD AL QAADYAANI.

qaabka oow u fasiray waan qilaafayaa, sidoo kale **AHLASUNA & SHIICO**

-Imaamkeena waxawaaye **MAXAMAD CABDU**.

Culumadii hore sida eey u hadli jireen JIILKA CUSUB ulama hadlaayo balse waan IJTIHAADAYAA wax cusub ayaan

masraxa dhex keenayaa.

Magaca ZEEYLICI

muqalidkii CARABTA in aan ka dhigo marna ma dhicidoonto.

Qur`aanka isaga ayaa is fasiro.dheelminta Nabigeena waxaa fasiraad u ah Daawashada Nabi Ibraahim. dhulka iyo cirka Dhamaan wax walba ayaa daaha looga qaaday waana daawaday Naarta iyo Janada.

MALAKUUTKA dhulka kudhexyaalo waa Naarta malakuutka Samadana waa Janada.

Nabigeena waxoow arkay oo la tusiyay Naarta balse dhulka hoose ayoow kusoo arkay umana dhoofin Samada balse Dhalo ladaawado oo sida Tv-ga ah ayaa laga dhex tusay.

SUUFIGA cilmigaas waxoow u yaqaanaa KASHFI.

aniga siraha SUUFIYADA yaan idiin kashifayaa. waayo

BEEYCO lama gelin SUUFIYADA

cilmiga aad ILHAAMKA ku heshid cidna ha usheegin sidaas leeyma dhihin . hadii aan wax qaldo allaha iga cafiyo hadii aan idiin sheego wax qalbigiina ku qanco iga qaata. Kitaabkeena Quraanka dhinacna uma dhaafin, dhexdiisa ayaan wax walba kasoo dhurayaa.

DHEELMINTA.

-isweydiinta waxeey tahay Janada xagee beey ku taalaa?.

-Cirka meel ka sareeyso ayeey ku taalaa. midaasna waa run.

Gabaygii HADRAAWI.

"Marna oogadeeniyo Waa oosha guudkoo Waa beer udgooniyo
Duni wada ilaysoo Waaceel irmaaniyo Togag wada ordaayiyo
Ilo wada xareedoo Lagu oon baxaayoo Naftu eegmo sugashada
Ashqaraar ka qaadoo

-JANADA sida oow Haraawi yiri waaye waxeey ku taalaa OOGADA SARE.

Dheelminta waxaa lagu dhex xusay in oow Naarta soo arkay

Nabigeena weliba Rag & Dumarna weey kabuuxeen.

Dadkaas Sidee beey ku galeen Naarta ?.

soow lama dhihin CADAAB QABRI ayaa jiro?.

SUNI&SHIICO waxaa qasab ah in eey qiraan sida aan aniga

qiray oo ah NAAR&JANO uunbaa wax jiro ah

qofka dhintay maanta labadaas midkood ayaa hursan.

-Nabiga hadii oow MICRAAJ sameeyay lana dhex geeyay

SAMADA, oowna halkaas ku soo arkay NAARTA.

Qofka Gaalka ah Samada looma furaayo soow lama dhihin

لاَ تُفَتَّحُ لَهُمْ أَبْوَابُ ٱلسَّمَآءِ وَلاَ يَدْخُلُونَ ٱلْجَنَّةَ حَتَّىٰ يَلِجَ ٱلْجَمَلُ فِى سَمِّ ٱلْخِيَاطِ وَكَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُجْرِمِينَ

40الأعراف

-waxaa nahay AHLAL QURAAN.

cida aan wax uqoraayo waa wiilasheena iyo gabdhaheena waxaan ula jeedaa kuwo aan jeclahay ayaa tihiin mana jecli in aan idin xujeeyo .

-waan ogahay weli kama jawaabin su`aashii aan halxiraalaha ka dhigay .

sheeg Aayad Qur`aan ah taasoo tilmaantay Nabi Ciise in oow dhulka kusoo laaban doono loona waxyoon doono.

hal-xiraalahaas weli waa ii nusanyahay kama aanan jawaabin.

balse hadeer midaan ayaan jawaabteeda idin siinayaa.

jawaab:

Naarta waxeey ku taalaa dhanka hoose .

أَسْفَلَ سَافِلِينَ

ayeey kutaalaa.

Janadana dhanka sare

Qofka Muslimka ah ayaana loo furayaa albaabada Janada iyo albaabada Samada.

(ilala ladiina aamanuu)

Xadiis ayaa jiro tilmaamayo in Albaabada samada lo furaayo qofka muuminka ah .

midka gaalka ahna laga soo celinaayo dhinacaas dhulka hoose halagu cadaabo ayaa ladhahayaa .

-Nabigeena meel Cirka kasareeyso looma dheelminin balse isagoo halkiisa joogo ayaa la tusay Janada sidookale Naarta.

Halayaabin hadalkaas waa sida Nabi ibraahim.

وَكَذَٰلِكَ نُرِيٓ إِبۡرَٰهِيمَ مَلَكُوتَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَلِيَكُونَ مِنَ ٱلۡمُوقِنِينَ

(ancaam.75)

==========

#MICRAAJKA &Tafsiirka.

تفسير مقاتل بن سليمان


150 Hijriga ayaa la qoray

Tafsiirkaas.

markoow fasiraayo Aayada

